

## Warbixin ku socota waalidka iyo dhallinyarada kuna saabsan baaritaanka macluumaadka dhallinyarada (ungdataundersøkelsen)

**Waxaa sanadkaan dugsiyada sare ee degmadaada/gobolkaaga ka dhici doona baaritaanka macluumaadka dhallinyarada. Ujeeddadu waa in fikrad fiican laga helo xaaladda korriinka dhallinyarada deegaanka. Baaritaanku dugsiya ayuu ka dhacayaa gu'ga dhexdiisa.**

### UJEEDDADA BAARITAANKA

- In dhallinyarada la siiyo fursad ay siyaasiyiinta deegaanka iyo mas'uuliyiinta ugu sheegaan sida ay korriimada maanta tahay.
- Aqoon cusub loo yeesho xaaladaha korriinka ee dhallinyarada loona isticmaalo hawlaha ay degmada iyo maammulka gobolku u qabtaan dadka da'daan ah.
- In la helo fursad lagu barbardhigo degmooyinka kale iyo tirooyinka dalka, gacanna laga geysto cilmibaarista.

### MAXAAN KUGU WEYDIIN DOONAA MACLUUMAADKA DHALLINYARADA?

- Xiriirka lala leeyahay dugsiya, saaxiibbada iyo waalidka
- Wakhtiga firaaqada la yahay iyo waxyaalaha wakhtigaas la qabto
- Isticmaalka saxaafadda
- Caafimaad, ka-helitaan iyo tayada noloshu
- Dhibidda
- Jebinta xeerarka, gacanqaadka iyo sakhrad
- Heerka waxbarasho ee waalidka

### SIDEE AYAA LOO FULIYAA MACLUUMAADKA DHALLINYARADA?

- Hal xisad ayaa loogu tala galay in baaritaanka laga jawaabo.
- Baaritaanku wuxuu u dhacayaa si elegtaroonig ah ayada oo bogga jawaabta ee macluumaadka dhallinyarada lagu gelayo fure aan horey loo sii aqoon oo hal mar shaqaynaya.
- Ardaydu waxay jawaabayaan ayaga oo istillaab saaraya foomka su'aalaha. Waa suurtaggal in lagu akhriyo su'aalaha foomka. Qofkii sidaas doonaya waa in uu isticmaalaa xargaha dhegaha la gashado ee wax lagu dhegaysto.

### XOR AYAA LOO YAHAY IN LAGA QAYBQAATO

- Ka qaybqaadashada baaritaanka xor ayaa loo yahay.
- Dadka ka jawaabaya way ka boodi karaan su'aalaha aysan doonayn in ay ka jawaabaan, haddii ay rabaanna ayaga oo dhexda maraya ayay isaga hari karaan.

### OGGOLAASHADA WAALIDKA

- Waalidka qofka dhallinyarada ah ee ka yar 18 sano ayaa go'aaminaya inuu ilmihisu baaritaanka ka qaybqaadanayo iyo in kale.
- Haddii aad doonayso inuu ilmahaagu ka qaybqaato, waxba lagaagama baahna inaad samayso.
- Haddii aadan doonayn inuu ilmahaagu ka qaybqaato, waa inaad taas macallinka xiriiriyaha ah/iskoolka u sheegtaa ka hor intaan baaritaanku billaaban.

### ILAAALINTA MACLUUMAADKA QOFKA

- Si ammaan ah ayaa loo xafidayaa jawaabaha ka-qaybqaatayaasha. Cilmibaarayaasha, la-taliyayaasha mashruuca iyo shirkadda jawaabaha diiwaangelinaysa oo keliya ayaa jawaabaha arki kara.
- Marka la soo bandhigo natiijooyinka baaritaanka, lama garan doono qofka iyo jawaabta gaarka ah ee uu baxshay.
- Macluumaadka cilmibaarista ee laga yaabo in ay ku jiraan macluumaad qofeed oo aan toos ahayn, waxaa lagu kaydin doonaa meel ammaan ah. Marka ay shan sano ka soo wareegto dhammaadkii baaritaanka ayaa macluumaadka oo dhan laga dhigi doonaa kuwo aan la garan karin qofka dhiibay.
- Baaritaanka macluumaadka dhallinyarada waxaa oggolaaday ilaaliyaha macluumaadka qofka ee OsloMet ([personvernombud@oslomet.no](mailto:personvernombud@oslomet.no)).
- Macluumaadka kumi jiri doonaan macluumaad qofeed oo toos ah, sidaas darteed suurtaggal ma aha in macluumaadka ka-qaybqaatayaasha la saxo ama la tirtiro baaritaanka kaddib.
- NOVA ayaa macluumaadka maammulaysa ayada oo ku salaynaysa oggolaashaha ka-qaybqaatayaasha.

### DIYAARGARAW

Adeegga caafimaadka ee dugsiya ayuu u yahay ardaydii u baahata baaritaanka kaddib. Wuxuu ardaygu la xiriiri karaa kalkaalisada caafimaadka ee iskoolka, macallinka bulshada ama «Kors på halsen», oo ah adeegga Laanqayrta Cas ee carruurta iyo dhallinyarada. Bogga internetka ee Kors på halsen waa: [www.korspahalsen.no](http://www.korspahalsen.no)

## **YAA MAS'UUL KA AH MACLUUMAADKA DHALLINYARADA?**

Baaritaanka waxaa fulinaya Machadka cilmibaarista samafalka NOVA ee OsloMet – jaamacadda magaalada weyn iyo xarunta aqoonta sakhradda ee gobolka (KoRus), ayaga oo shaqada u qabanaya degmada.

## **SU'AAL MA QABTAA?**

La xiriir dugsiga ama KoRus-ka gobolkaaga si ay warbixin dheeri ah kaaga siiyaan baaritaanka.

Haddii aad doonayso in laguu soo diro foomka su'aalaha oo ku qoran afingiriis ama afnorwiji waxaad la xiriiri kartaa KoRus.